

X. M. J. 10 Abiriile 1861, lamba. 92

U-ruqseynta xarunta Hargeysa, ee Bangiga Qaranka Soomaaliyeed, in sameeyo hawlgallo amaah oo caadi ah.

MADAXWEYNAHA KMG EE JAMHUURIYADDA

Markuu arkay qodobka 63aad; ee Dastuurka;

Markuu arkay qodobka 9aad, Xeerka – Sharci, ee 30 Juunyo 1960, lamba. 3, oo loo rogay, ayada oo wax-ka-beddello lagu sameeyey, Sharciga 13 Jennaayo, 1961, lamba. 2;

Markuu garwaaqsaday baahida iyo degdegta loo qabo in Xarunta Hargeysa oo dhismaha socdo, ee Bangiga Qaranka Soomaaliyeed, loo idmo in ay sameyso, ayada oo lagu darayo awoodda xeer, ee Dastuurka, iyo kabidda hawlgallada bangi oo lagu tala-jiro, ee uu leeyahay Bangi Dhexe hawlgallo kastoo kale, ee ammaah caadi ah.

Markuu dhegeystay Golaha Wasiirrada;

Soojeedinta Wasiirka Kowaad oo is-af-garad la yeeshay Masiirrada Lacagta (Maaliyadda) iyo Wershadaaha iyo Ganacsiga;

WUXUU XEERAYAA

QODOB KALIYAALE

Si loo dhammeystiro nidaamka (hanaanka) bangiyeed, ee Gobolka Waqooyi, xarunta dhismaha lagu hayo, ee Hageesa, ee Bangiga Qaranka, Soomaaliyeed, marka lagu daro hawlgallada bangiyeed oo uu dhigayo qodobka 8aad, ee Sharciga aasaaska, waxaa loo idmayaa in ay ku dhaqaaqdo hawlgallada soo socda:

- 1) bixinta wixii saameyn ganacsiyeed ah ama kambiyaale, ku socda amarka isla Bangiga ama asaga loo wareejiyo, dusha Soomaaliya iyo dibedda;
- 2) bixinta jeegagga bangiyeed iyo guud ahaan wixii warqado iyo dokumentiyo matalaya (ay ku cillan tahay) ammaah gudaha ama caalami ah;
- 3) furitaan xisaab socota deyn ahaan ama dabool laaan ah, oo ay wehliso dammaanad ama dammaanad laaan ah, furid ammaah fudud ama dokumenti ku qoran oo lagu isticmaali karo gudaha Soomaaliya ama dibedda; bixin kab ay rahan damaanad u tahay, wareejin ama dhisid rahan guurto, ee deyn la hubo ama naqdi (caddaan) xagga maamullo guud, amaba ay u yihiin dammaanado kale oo cayn ah;
- 4) Bixin wax diibaajiyo ah, dammaanad, ballan-qaad deyn-bixin leh caddeyn qoran iyo kafaala-qaad xataa xagga xisaab dad saddexaad;
- 5) Fulinta hawlgal kastoo kale, ee khidmad ama dillaal bangiyeed ama lacageed.

Muqdisho, 10^{kii} Abiriile 1961.

Aadan Cabdulle Cusmaan

Wasiirka Kowaad

Cabdirashiid Cali Sharmarke

Wasiirka Wershadaaha iyo Ganacsiga

Shekh Cabdulle Maxamuud

Wasiirka Maaliyadda

Cabdulqaadir Maxamed Aadan

Waa arkay waana Diiwaangeliyey –

Diiw. lamba. 5, Xaashi lamba. 249.

Muqdisho, 19 Abiriile 1961.

Hantidhowraha: **Axmed Dahir**